



# KULANKA KOWAAD EE SUUM (ZOOM)

1

Adigoo adeegsanaya kiiboodhka (keyboard) magacaaga geli. Waxa fiican inaad Caadaysato inaad geliso magacaaga kowaad iyo kan labaad. Ka dib, dooro **Waa Yahay (OK)**.

Please enter your name

Cancel Continue

Aaladaadu waxay ku weydiin doontaa ogolaansho aad ku isticmaasho codkaaga iyo fiidiyowgaaga. Dooro **Waa Yahay (OK), Haa ama u oggolow**.

2

Soo bandhigga Fiidiyowgaaga ayaa laga yaabaa in uu soo baxo. Dooro **Ku soo biir Fiidiyowga**.

Join with Video

Join without Video

3

Markaad soo gasho kulanka, markiiba hagitaan ayaa muuqan doona, **“Si aad u maqasho dadka kale fadlan ku biir codka”,** dooro **Wicitaanka adoo adeegsanaya Codka Internetka ama Wac adigoo adeegsanaya Codka Kombuyuutarka.**


To hear others  
please join audio

Call using Internet Audio

Dial in

Cancel

Haddii hagitaanku uusan muuqan xulo badhanka **ku soo biir Maqalka.**



## Fiiro gaar ah:

Hadii aanad aaladaada ku haysan makarafoon shaqaynaya iyo/ama samaacad markaa dooro **Garaac**. Dooro dalka aad ka soo hadlayso. Haddii aad ka gelayso telefoonka casriga ah, lambar uun ka dooro liistada, dooro garaac dibna ugu laabo barnaamijka Suum ( Zoom). Haddii aad isticmaalayso aalad kale, adeegso telefoon si aad u garaacdo lambarka shaashada ka muuqda, lambarka aqoonsiga kulanka (meeting ID) iyo lambarka sirta ah (pass code) ayaa loo baahan doonaa.